

Rugta tallaalka iskuulka ka dib Ardayda Fasalka 6-aad: Ilmahaagu ma qaatay tallaaladoodii joogtada ahaa?

After a school immunization clinic

Grade 6 students: Did your child have their routine vaccines?

Sanadkaan, ardayda Fasalka 6-aad waxaa tallaaladii joogtada ahaa lagu siiyey rugaha tallaalka iskuulka. Haddii aan ilmahaaga tallaalo ku siinay rugta tallaalka iskuulka, waxaan xogaha tallaaladaas galinay galka tallaalka elektaroonikada ah ee ilmahaaga.

Haddii ilmahaagu aysan tallaaladoodii ka qaadan iskuulka adiguna aad soo celisay foomkii ogolaanshaha oo buuxsan, waxaa ilmahaagu tallaalada ka qaadan karaan rugta kale ee tallaalada iskuulka ee sanad dugsiyeedkaan ama Fasalka 7-aad. Haddii aad rabtid, waxaad ballan tallaal ka qabsan kartaa dhakhtarka qoyska, kalkaaliyaha caafimaadka idman, farmashiyaha, ama waaxda caafimaadka dadweynaha deegaankaaga. Dhammaan tallaalada joogtada ah waa lacag la'aan Biritish Kolombiya.

Fiiro gaar ah: Dhakhtarada qoyska, kalkaaliyaasha caafimaadka idman, ama farmashiyaasha dhammaantood ma wada bixiyaan tallaalada. Hubi in aad sii wacdid oo xaqiijisid.

Si aad ballan tallaal uga qabsatid waaxda caafimaadka dadweynaha:

- Wac 604-702-4906 haddii aad ku nooshahay Mission, Abbotsford, Chilliwack, Agassiz, iyo Hope.
- Wac 604-476-7087 haddii aad ku nooshahay mid ka mid ah deegaanada kale ee hay'adda Caafimaadka Fareysar (Fraser Health).

Hubi in xogaha galka tallaalka ilmahaagu ay dhammaystiran yihiin

Haddii ilmahaagu ka qaatay ama ka qaato tallaalada joogtada ah midkood meel ka baxsan rugta tallaalka iskuulka, sida dhakhtarka qoyska, kalkaaliyaha caafimaadka idman, ama farmashiyaha, fadlan samee sidaan soo socota:

- La xiriir daryeel caafimaad bixiyihii ilmahaaga tallaalay oo weydiiso nuqulka xogta tallaalka.
- Ku wargali tallaaladaan hay'adda Caafimaadka Dadweynaha khadka internetka adiga oo booqanaya bartaan [FraserHealth.ca/immunizationform](https://www.fraserhealth.ca/immunizationform).



Wixii kale oo xogo dheeraad ah, fadlan wac waaxda caafimaadka dadweynaha deegaankaaga ama booqo barteena internetka: [FraserHealth.ca/immunize](https://www.fraserhealth.ca/immunize).



Waaxyaha Caafimaadka Dadweynaha (Public Health Units)					
Abbotsford 604-864-3400	Agassiz 604-793-7160	Burnaby 604-918-7605	Chilliwack 604-702-4900	Cloverdale 604-575-5100	Guildford 604-587-4750
Hope 604-860-7630	Langley 604-539-2900	Maple Ridge 604-476-7000	Mission 604-814-5500	New Westminister 604-777-6740	TriCities (Port Moody) 604-949-7200
Newton 604-592-2000	North Delta 604-507-5400	North Surrey 604-587-7900	South Delta 604-952-3550	White Rock 604-542-4000	